HWDSB

# Foomka Ardayga ee Caddaynta Ka Reebanaanta Xidhashada Maaskarada

Gudida Dugsiga Degmada Hamilton-Wentworth waxay soo jeediyeen in qaabkan soo socda la raaci doono marka ay noqoto xidhashada ay ardaydu xidhanayso maaskarada aan ahayn nooca shaqaalaha caafimaadka ama maaskarada marada ah:

**Ardayda**

- Ardayda oo dhan waxa looga baahnaan doonaa inay xidhaan maaskarada aan ahayn ta shaqaalaha caafimaadku xidhaan ama marada ah marka ay iskuulka joogaan (tanoo ay ka mid tahay daaradaha iyo fasalada), baska ay saaran yihiin, ama dibadaba ay joogaan laakiin aanay awoodin inay kala fogaadaan. Wakhtiyada dibad u bixidda sida nusasaacaha waxa loo isticmaali karaa fursado ay ardaydu kaga nasan karto xidhashada maaskarada marka ay kooxohooda dhex joogaan, iyadoo ay shardi tahay inay tallaabooyinka kala fogaanshaha si sax ah u raacaan.
- Maasakarooyinku waa inay daboolaan sanka, afka, iyo gadhka iyadoo aanay jirin meelo banbanaani. Tani waxa ay kordhinaysaa faa'idada xidhnaanshiyaha maaskarada. Masarada iyo cumaamadaha looma tixgelinaayo inay yihiin maaskaro.
- shaqaalaha ayaa laga codsaday inay xalliyaan mushkiladaha shakhsiyadeed sida inuu arday u baahdo inuu iska bixiyo maaskarada kana nasto isagoo istaagaaaya daarada (isagoo ay weli arkayaan shaqaaluhu), hal qof markiiba, muddo hal ama labo daqiiqo ah, halkaasoo markaasi kala fogaanshiyo 2 mitir ah la samayn karaayo.

Ardaydu waa ay xidhan karaan maaskarahooda aan kuwa shaqaalaha caafimaadku xidhaan ahayn iyadoo ay shardi tahay in ardayga maaskaradiisu uu ahaado mid qaab sax ah loo xidhan karo. Maaskarooyinka aan kuwa shaqaalaha caafimaadku xidhaan ahayn ayaa sidoo kale loo diyaarin doonaa ardayda. Ka reebnaanshiyaha xidhashada maaskarada ee sababteedu macquulka tahay waa la oggolaan doonaa. Waraaq caafimaad oo lagaaga baahan yahay ma jirto.

Magaca Ardayga:________________________________ Taariikhda Dhalashada:_____________________________

Anigoo ah Waalidka ama Koriyaha_____________________ ama arday qaan gaadh ah, waxa aan ka markhaati kacayaa xaqiiqada ah in ilmahaygu ama naftaydaba (haddii arday qaangaadh ah aad tahay) u codsanaayaa in laga dhaafo/iga dhaafo xidhnaanshiyaha maaskarada aan ta shaqaalaha caafimaadku xidhaan ahayn ama marada ah marka aan iskuulka joogo, (tanoo ay ka mid tahay daaradaha iyo fasalada), baska aan saaranahay/uu saaran yahay, ama dibadaba ay joogaan laakiin aanay awoodin inay kala fogaadaan. Waxa aan fahamsanahay in ay macquul tahay in layga reebo iyadoo ay sabab u tahay sababaha hoos ku xusan (fadlan dooro ugu yaraan hal mid):

☐ Sabab **caafimaad, korriimo, dareen ama maskaxeed** tanoo ka hortagaysa awoodda xidhasho ee naftayda/ilmahayga inuu xidho maaskarada aan ta shaqaalaha caafimaadku xidhaan ahayn qaabka ay u waajibinayso Wasaarada Waxbarashadu ama maamulada Caafimaadka Dadweynaha

☐ qofkasta oo neef qabatin leh ama aan awoodin inuu iska saaro maaskarada caawimo la'aan, qaabka ay waajibinayso Wasaarada Waxbarashada ama maamulada Caafimaadka Dadweynaha

Garowsaday oo caddaynayaa tan________ maalinta_____________________, 2021

_________________________________________ _____________________________________________________

Magaca Ardayga Waalid/Koriye/Daryeele/Arday da'diisu tahay 18+ Saxeexa

===========================================================================================================

**Office Use Only**

☐ Entry into PowerSchool (date): _______________________

(Retain signed paper form in office for one year and then securely destroy.)

curiosity • creativity • possibility